DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga-soo-noqdey iyo Barakacayaasha

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga-Soo-Noqdey iyo Barakacayaasha

## Tusmada


Xuruufaha Ereyo Laga Soo Gaabiyey ........................................................ 5

Erey-bixin ........................................................ 6

Khariidadda Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya ........................................................ 10

Arar ........................................................ 11

Raadraac ........................................................ 12

CUTUBKA 1AAD: HORDHAC ........................................................ 13

1.1 Himilada Siyaasadda Qaran ........................................................ 13

1.2 Yoolka Siyaasadda Qaqan ........................................................ 13

1.3 Ujeeddooyinka Siyaasadda Qaran ........................................................ 13

1.4 Baaxadda iyo qaabka guud ee siyaasadda qaran ........................................................ 14

1.5 Shuruucda Qaran iyo Kuwa Caalamiga ah ee kaabaya siyaasaddan ........................................................ 16

CUTUBKA 2AAD: MABAA'DIIDA HAGAYA SIYAASADDAN ........................................................ 18

Mabda'a 1aad: Siyaasadda ........................................................ 18

Mabda'a 2aad: Ka-ilaalinta xoog ku-barakicin ........................................................ 18

Mabda'a 3aad: Ilaalinta marka uu jiro barakaca ........................................................ 18

Mabda'a 4aad: soo-noqosho khiyaari ah iyo u-madax-bannaanshaha

kala doorashada xalal ........................................................ 19

Mabda'a 5aad: Xoriyadda dhaqdhaqaaqa iyo doorashada halka ay degayaan ........................................................ 20

Mabda'a 6aad: Xuquuqda heer nololeed oo caadi ah ........................................................ 20

Qodobka 7aad: Shakhsiyaadka nugul iyo shakhsiyaadka naafada ah ........................................................ 21

Mabda'a 8aad: Dokumenti-gareynta qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha ........................................................ 21

Mabda'a 9aad: In aan la takoorin qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha ........................................................ 22

Mabda'a 10aad: isuduwidda wada-hawlgalayaasha dawladda iyo kuwa caalamiga ah iyo deeq-bixiyeyaasha....................23
Mabda'a 11aad: Qorshe ku-talogal ah iyo gurmad degdeg ah....................24
CUTUBKA 3AAD: XALAL WAARA: KHARIIDADDA WADDADA LOO MARAYO JOOJINTA BARAKAC KA DHACA SOOMAALIYA....................25
3.2 Xalal waara: jaangooyooyinka iyo geeddi-socodyada....................25
3.3 Xalal waara: shuruudaha iyo tallaabooyinka taageerada ah....................26
CUTUBKA 4AAD: QAABKA GUUD EE DOORARKA IYO MAS'UULIYADAHA LA KALA LEEYAHAY....................33
4.1 Doorkarka iyo mas'uuliyadaha Dawladda Federaalka Soomaaliya....................33
4.1.1 Doorarka iyo mas'uuliyadaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta....................33
4.1.2 Doorarka iyo mas'uuliyadaha wasaaradaha kale....................34
4.1.3 Doorka gaarka ah ee Wasaaradda Qorsheynta (MOPIED)....................34
4.2 Doorarka iyo mas'uuliyadaha Dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir....................35
4.3 Doorka bulshooyinka uu barakacu saameeyey....................35
4.4 Doorka bulshada rayidka ah ee heer qaran....................36
4.5 Doorka beesha caalamka....................36
4.6 Doorka guddi-hawleedda....................37
CUTUBKA 5AAD: HIRGELINTA IYO QORSHE-HAWLEEDKA QARAN....................39

## XURUUFAHA EREYO LAGA SOO GAABIYEY

| | |
|---|---|
| AIDS | *Acquired Immunodeficiency Syndrome*/Cudurka hoos u dhiga difaaca jirka dadka ee AIDS-ka |
| MGB | Maamulka Gobolka Banaadir |
| DXF | *Federal Member States*/Dawlad-goboleedyada Xubinta ka ah Dawladda Federaalka |
| HIV | *Human Immunodeficiency Virus* / fayruska hoos u dhiga difaaca jirka dadka |
| IDP | *internally displaced person* / barakace |
| ITRRI | *Inter-Ministerial Task Force for Refugee-Returnees & IDPs* / Guddi-hawleedka Wasaaradaha ka Dhexeeya ee Arrimaha Qaxootiga soo noqdey & Barakacayaasha |
| MOPIED | *Ministry of Planning, Investment and Economic Development* / Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha |
| NCRI | *National Commission for Refugees and IDPs* / Hay'adda Qaran ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha |
| NGO | *nongovernmental organization* / urur aan dowli ahayn |
| NPRRI | *National Policy on Refugee-Returnees and IDPs* / Siyaasadda Qaram ee Qaxootiga-soo guryo-noqdey |
| UN | *United Nations* / Qaramada Midoobey |

## EREY-BIXIN

**Qorshe ku-talogal ah:** In diyaar-garow la sameeyo si loo diyaar ahaado haddii ay timaaddo xaalad degdeg ah (tusaale ahaan, la-socoshada macluumaadka digniinta hordhaca ah, in keyd cunto iyo agabka aan cuntada ahayn lagu sii diyaariyo meelaha looga baahan yahay, iyo hubinta in shaqa-alaha lagu tababbaro aqoonsashada xaaladaha ay u badan tahay in ay soo dersaan iyo waxa ugu xun ee imaan kara). Qorsheyaasha ku-talogalka ah waa in ay ka mid ahaadaan waxyaabaha iman kara iyo qiyaasaha qorsheynta, waana in iyada oo qiyaasahan laga duulayo la aqoonsadaa mas'uuli-yadda cid walba ay ku leeyahay waxqabad si wanaagsan la isula jaangooyey.

**Bulshooyinka uu saameeyey barakaca:** Waxaa soo hoos gelaya dhammaan dadweynaha barak-acay oo ay ka mid yihiin qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha; bulshooyinka iyo dadwey-naha lagu soo barakacay; iyo bulshooyinka qaabilaya qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha ee ku dhaqan degaannada lagu soo noqonayo, degaamada ay rasmi u degayaan dadkaas, ama degaamada kale ee dalka oo ay go'aansadaan in ay degaan.

**Xal waara:** Xal lagu xaqiijinayo in qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaashu aaney u sii baahan gargaar gaar ah iyo baahiyo dhinaca ilaalinta ah oo la xiriira barakacooda, ayna ku heli karaan xuquuqahooda dastuuriga ah iyo kuwa aadamenimo iyada oo aan lagu takooreynin barakacooda. Xaqiijinta xal waara waxaa ay u baahan tahay geeddi-socod (dib-u-) dhexgelid oo ka dhaca halka ay asal ahaan ka soo jeedaan ama ay noqonayaan, degaamada ay magangalaan barakacayaasha ama meelo kale oo dalka ka mid ah.

**Xoog ku-kicin:** In si joogto ah ama muddo gaaban ah iyaga oo aan raalli ka ahayn shakhsiyaad, qoysas ama bulshooyin looga saaro guryo ama dhul ay deggan yihiin, iyada aan la siineynin ama aaney helin qaabab sharci ama ilaalin kale oo ku habboon.[1]

**Dawlad:** Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee heer federaal.

**Degaanka caadiga ah:** Goobta ay qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaashu ay caadi ahaan deg-ganaan jireen barakaca ka hor.

**Dalalka lagu soo qaxay/martigeliyey:** Dalalka qaxootiga Soomaaliyeed ku martigelinaya dhulkoo-da.

**Barkacayaal gudaha (IDPs):**

Marka ay joogto siyaasaddan, barakacayaashu waxaa ay qaxootiga soo noqdey kaga duwan yihiin, waxyaabahan soo socda:

b. Barakacayaasha guduhu waa:

1 UN Committee on Economic, Social and Cultural Rights (CERCR)General Comment No. 7: The right to adequate housing (Art.11.1): forced evictions, 20 May 1997, E/1998/22.

- Shakhsiyaad ama koox shakhsiyaad ka kooban oo lagu qasbey ama lagu sandulleeyey in ay ka tagaan guryahoodii asalka ahaa iyo degaannadoodii caadiga ahaa, taas oo gaar ahaan ka dhalatey ama ay keentey in ay ka baxsadaan dhibaatooyin ka soo gaara colaad hubeysan, gacan-ka-hadal ku saleysan qabiil ama gacan-ka-hadal guud oo noocyo kale ah iyo nabadgelyo-xumo, mashaariic horumarin, ku-xadgudubid xuquuqaha aadamaha, ama aafooyin dabiici ah ama kuwo dad-samee ah, dadkaas oo aan ka gudbid xudduud caalami ah oo uu dal leeyahay oo si caalami ah loo aqoonsan yahay;

- shakhsiyaad ama kooxo shakhsiyaad ah oo xoog looga soo saarey guryahoodii ama dhulkii ay degganaayeen, oo aan haysan guri ku habboon ama dhul kale ama mag-dhow ku habboon oo u saamaxaya in ay noloshooda mar kale ay dib ugu dhisaan si waarta; iyo

- dad xoolo-dhaqato ah oo ay u suuroobi weysey in ay gaaraan degaamadii sida soo jireenka ah ay reer-guuraagu ugu noolaan jireen taas oo ka dhalatey xoolihii oo ka dhammaadey, ama in aaney gaari karin daaqii iyo biyihii ama suuqyadii, sidaa daraaddeedna ka tegey meeshii ay caadi ahaan ku noolaan jireen.

- Qaxooti soo noqdey waa kuwa mar labaad gudaha ku barokacay ka dib markii ay soo noqdeen, ama ay la soo gudnaato xaalad barakac kale ka dib marka ay yimaadaan, ama ay la soo gudboonaato xaalad barakac dabadheer oo la mid ah tan barakacayaasha gudaha dalka ku barakacay taas oo ka dhalatey in aaney awoodin in ay ku noqdaan degaannadoodii hore ama meelihii ay caadi ahaan degganaan jireen. Si la mid ah sida barakacayaasha, ayaa qaxootiga soo noqdey ay siyaasaddan u khuseysaa iyada oo aan wax loo dhimin heshiisyada caalamiga ah iyo qorsheyaasha u habboon xaaladdooda.

- shakhsiyaadka soo hoos-gelaya qaybaha b iyo t ayaa ah barakacayaal gudaha (IDPs) iyada oo aan loo eegin in ay joogaan xeryaha loo aqoonsan yahay barakacayaasha ama in ay ku nool yihiin degaanno magaalo ah iyaga oo ku dhex nool bulshooyin aan barakicin ama la nool qoysas martigeliyey; iyada oo aan loo eegin sababta keentay iyo muddada ay barakaca ku jiraan, iyo qabiilkooda iyo degaanka ay asal ahaan ka soo jeedaan.

**Dhexgal/ku-milmid:** Geeddi-socodka ay qaxootiga soo noqdey ay kula qabsanayaan caadooyinka bulsho, dhaqmeed, siyaasadeed iyo dhaqaale ee bulshada cusub ka dib barakacooda ama soo noqoshadooda. Hadafka laga leeyahay waa in qaxootiga soo noqdey iyo barkaacayaasha guduhu ay helaan xuquuqo, nidaamyo iyo adeegyo la mid kuwa ay helaan dadka ay ku dhex nool yihiin, si nabad-ku-wada-noolaansho ah iyo iyaga oo aan u baahan gargaar gaar ah.

**Hay'adda hormuudka u ah:** Wasaaradda, guddiga, hay'adda ama ururka (mid dawladeed ama mid gaar ah) ee ay Dawladda Federaalka Soomaaliya u xil-saarto mas'uliyadaha maareynta arrimaha la xiriira qaxootiga, qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha gudaha.

**Hay'adda Qaran ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha/*National Commission for Refugees and IDPs* (NCRI):** Hay'ad hawlihieeda u madax-bannaan ee heer federaal ah oo mas'uul ka ah dadka qaxootiga ah ee soo noqdey, qaxootiga iyo barakacayaasha gudaha, oo lagu dhisey Sharciga Dhisidda Hay'adda Qaran ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha (Sharci Lr. 2 ee soo baxay 2016).

**Shakhsiyaadka ay khuseyso/*Persons of concern*:** Qaxootiga soo noqdey, barakacayaasha gudaha iyo bulshooyinka martigelyey ee nugul ee ku dhaqan Soomaaliya.

**Ilaalin:** Waxaa ay la halmaashaa dhammaan hawlaha looga danleeyahay in lagu gaaro in si buuxda loo ixtiraaamo xuquuqaha shakhsiyaadka si waafaqsan macnaha muuqda iyo macnaha gunta dheer ee Dastuurka Qaranka, iyo si waafaqsan sida ay Soomaaliya uga go'an tahay fulinta ballanqaadyada ay sameysey oo ku aaddan sharciga xuquuqaha aadamaha, sharciqa caalamiga ah ee bani'aadamnimada iyo sharciga caalamiga ah ee qaxootiga. Qaxootiga soo noqdey iyo barkacyaasha waxaa ay xaq u leeyihiin in laga difaaco dhibaato jireed iyo mid nafsi ah oo soo gaarta, baylahsanaan dhaqaale iyo mid bulsho oo ka dhalata xaaladda ay ku sugan yihiin ee qaxooti soo noqdey ahaansho ama barakacenimo, waxaana ay xuquuq u leeyihiin in la ixtiraamo iyo in la ilaaliyo xuquuqahooda aan la duudsiin karin. Xuquuqahaani waa in ay la mid ahaadaan kuwa ay leeyihiin dhammaan muwaadiniinta kale ee dalka.

**Qaxootiga soo noqdey:** Qaxootigii Soomaaliyeed ee hore oo si iskood ah dib ugu noqda degaannadii ay asal ahaan ka soo jeedeen ama goobaha ay caadi ahaan degaan ama meel Soomaaliya ka mid ah si ay ugu noolaadaan.

**Dib-u-dhexgal:** Dib-u-dhexgalka ay qaxootigii hore ee soo noqdey iyo barakacayaashii hore ay dib u dhex galaan arrimaha bulsho, dhaqaale, dhaqan iyo siyaasadeed ee bulshadii ay asal ahaan ka soo jeedeen ama gobollada kale ee ay iyagu go'aansadaan, kuwaas oo ay ku heli karaan xuquuqo, nidaam iyo adeegyo la mid ah kuwa ay helaan dadka ay ku dhex nool yihiin, si nabad ku wada noolaansho ah.

**Dib-u-celin:** Waa xaalad ay qaxootiga, si xor ay u doortaan, in ay ku noqdaan Soomaaliya, ama goobihii iyo dalalkii ay asal ahaan ka soo jeedeen ama ay dhalashadooda haystaan ka dib markii ay barakac nooca uu doono ha ahaadee ay kaga soo qaxeen. Xuquuqda loo leeyahay in aan khasab lagu celin, sida lagu aqoonsadey Heshiiskii 1951 ee La Xiriirey Xaaladda Qaxootiga, ayaa ah mid aan la laali karin waana in dhammaan dib-u-celinta ay taageerto siyaasaddan ahaatana mid khiyaari ah.

**Dib-u-noqosho:** Siyaasaddan dhexdeeda, dib-u-noqoshada waxaa ay khusaysaa qaxootiga Soomaaliyeed iyo barakacayaashaba, waxaana soo hoos gelaya in dib-u-celin khiyaari ah oo qax-

ootiga Soomaaliyeed lagu celiyo Soomaaliya iyo sidoo kale dib-u-noqosho khiyaari ah oo barakacayaasha ay dib ugu noqdaan degaanadii ay asal ahaan ka soo jeedeen ama degaannadii ay caadi ahaan ku noolaan jireen.

**Heshiis saddex-geesood ah:** Waa dokumenti sharciyeed oo ay ku heshiiyeen ayna saxiixeen saddex dhinac (Dawladda Federaalka Soomaaliya, dalka martigeliyey qaxootiga iyo Hay'adda Qaramada Midoobey ee Qaxootiga), kaas oo qeexaya heshiiska ay ka gaareen doorarka kala duwan ee ay ku kala leeyihiin fududeynta dib-u-noqoshada khiyaariga ah ee qaxootiga Soomaaliyeed ay dib ugu noqonayaan Soomaaliya.

**Barakacin sharci-darro ah:** Barakicin jebineysa sharciga dalka ama sharciga iyo jaangooyooyinka caalamiga ah, taas oo ay ka mid tahay ka saarista guri ama dhul ee waafaqsan noocyada barakacinta mamnuuca ah ee uu taxayo Qodobka 4(4) ee Heshiiska Midowga Afrika ee Ilaalinta iyo Gacansiinta Barakacayaasha jooga Afrika (Heshiiska Kampala/*Kampala Convention*).

## KHARIIDADDA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA AH EE SOOMAALIYA



## ARAR

Ujeeddada ugu weyn ee laga leeyahay siyaasaddan waa in la hubiyo in dhammaan qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha gudaha (IDPs) ay helaan sinnaan dhammeystiran iyo xuquuqo la mid ah kuwa ay Dastuurka Qaranka Soomaaliyeed iyo shuruucda xuquuqaha aadamaha iyo sidoo kale shuruucda caalamiga ah ee bani'aadamnimada iyo kuwa xuquuqaha aadamaha ay siiyeen dhammaan muwaadiniinta. Waa in aan qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha laga takoorin in ay helaan ama ay ku naalloodaan xuquuq iyo xorriyad kasta iyaga oo ay tahay in ay xuquuqdaas ku helaan dhulka ay ugu nool yihiin qaxooti soo noqdey ahaan ama barakacayaal ahaan. Hadafka arrintan laga leeyahay waa in dadka ay khuseyo laga ilaaliyo barakicin xoog ah oo hor leh, in ilaalin iyo gacan la siiyo inta ay barakacyaal yihiin iyo in xal waara loo helo barakacooda.

Muwaadiniinta Soomaaliyeed, marka ay dalal kale ku nool yihiin, waxaa ay xaq u leeyihiin in ay taageero ka dalbadaan ama codsadaan hay'adaha dawladda Soomaaliyeed (tusaale ahaan, safaaradaha iyo qunsuliyadaha ka furan dalalka ay ku nool yihiin), in kasta oo waajibka iyo mas'uuliyadda aasaasiga ah ee dawladda martigelisey ay tahay in qaxootiga jooga dalkeeda ay ilaaliso ayna taageerto sida ay dhigayso qawaaniinta caalamiga ah. Sidoo kale, qaxootiga soo noqdey waxaa ay xaq u leeyihiin in ay ilaalin ka codsadaan ayna ka helaan maamullada heer qaran, gobol iyo degmo, waana in aan loo dhibaateyn ama si xun loola dhaqmin marka ay dalbashooyinkaas sameynayaan.

**Siyaasaddan dhexdeeda, Dawladda Federaalka ee Soomaaliya waxaa ay isku waajibisey in ay:**

b. bixiso adeegyada, ilaalinta iyo gargaarka bani'aadamnimo ee lagamamaarmaanka u ah qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha ku sugan dalka;

t. intii suuragal ah, dadkeeda ka ilaaliso barakac nooca uu doono ha ahaadee oo uu ka mid yahay barakicin sabab la'aan ah, barakicin loo cuskadey horumarin, xoog ku kicin iyo aafooyinka dabiiciga ah;

j. raadinta xalal waara oo loo helo barakaca dadka, iyo khafiifinta sababaha keena barakac hor leh;

x. fududeynta soo-noqoshada, meel kale u guuridda iyo dhexgelidda degaanka ee qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha;

kh. xaqiijinta in qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaashu ay helaan fursado ay ugu dhaqmi karaan ayna ku heli karaan xuquuqo la mid ah, ayna ku heli karaan adeegyo la mid ah kuwa ay helaan muwaadiniinta kale;

d. hubinta in shakhsiga sameeyey lagula xisaabtamo falalka barakicinta sabab la'aanta ah sida ay dhigayaan shuruucda fal-dembiyeedyada ee dalka u yaalla iyo kuwa caalamiga ah;

r. intii suuragal ah, u qoondeynta kheyraad/maal wax looga qabto baahiyaha iyo ilaalinta

xuquuqaha barakacayaasha; iyo

s. mabaa'diida hagaya ee lagu qeexay Cutubka 2aad ee siyaasaddan ay gaarsiiso hay'adaha ku shaqada leh iyo in ay u baahiso sida ugu ballaaran ee suuragalka ah.

## Raadraac

Dawladda Federaalka Soomaaliya waxaa ay qireysaa in, siyaasaddan dhexdeeda, ay qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaashu ay yihiin muwaadiniin Soomaaliyeed ama dad caadi ahaan deggan Soomaaliya, waxaana ay aqoonsan tahay waxtarkooda iyo muhiimadda ay dadkani u leeyihiin ka-shaqeynta dib-u-dhiska dhaqaalaha, nabad-dhisidda iyo xasilinta dalka. Muwaadiniin ahaan ama dad caadi ahaan deggan Soomaaliya ahaanba, dhammaan qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha waxaa ay xaq u leeyihiin dhammaan xuquuqaha dastuuriga ah iyo xuquuqaha aadamaha ee ay leeyihiin muwaadiniinta kale, si takoor la'aan ah.

Tan iyo sanadkii 1991, malaayiin Soomaali ah ayaa ka qaxay guryahooda iyaga oo ka baxsanaya dagaalladii u dhexeeyey kooxaha kala duwan ee iska soo horjeedey. Muddadan dhexdeeda, ayaa colaad iyo gacan-ka-hadal guud oo dhacay ay sababeen barakac ballaaran oo ka dhacay gudaha dalka, waxaana muwaadiniin badan ay ka gudbeen xuduudda Soomaaliya si ay u noqdaan qaxooti. Kumannaan qof ayaa qaxootinimo ku galey gobolka Geeska Afrika oo dhan, halka kuwo kale dib-u-dejin loogu sameeyey dalal kale oo ka sii fog.

Tobankii sano ee la soo dhaafey, Soomaaliya waxaa soo marey gacan-ka-hadal ka dhashey kacdoon, iyo sidoo kale abaaro soo noqnoqdey, oo sababey macaluul iyo xaalado kale oo degganaansho la'aan ah oo ka dhacay gudaha dalka; xaaladahaas ayaa xawaare-geliyey oo uga sii daray xaaladda barakaca. Intaa waxaa dheer, nabadgelyo-xumo guud ayaa xaddiddey helidda gargaar bani'aadamnimo iyo mid horumarin oo la gaarsiiyo dadka nugul iyo barakacayaasha ku nool meelo ka mid ah dalka.

Soomaaliya waxaa ka jira nidaam dawladeed oo aan ku-meelgaar ahayn oo qaadaya mas'uuliyadda raadinta iyo fududueynta xalal waara oo loo helo qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha dalka. Dhisidda iyo awood-siinta Hay'adda Qaran ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha (NCRI)waxaa ay gacan ka geysan doontaa helidda xalal waara oo loo helo barakaca. Marka dhinacaas laga eego, mid ka mid ah ujeeddooyinka ugu waaweyn ee Hay'adda NCRI waa in ay "istiraatiijiyado, qorsheyaal hawlgal iyo barnaamijyo ka dejiso arrimaha la xiriira shakhsiyaadka ay khuseyso iyada oo gacan laga helayo hay'adaha dawladda, Hay'ada Qaramada Midoobey iyo hay'adaha kale ee u habboon iyada oo la raacayo jaangooyooyinka caalamiga ah …" (Qodobka 5(2) ee Sharciga Lagu Dhisey ee Lr. 2 ee soo baxay 2016).

## CUTUBKA 1AAD: HORDHAC

Qoraalka siyaasaddan waxaa uu mabaa'diidii hagi lahaa u dejinayaa hay'adaha dawladda, hay'adaha caalamiga ah, ururrada aan dawladaha ahayn ee maxalliga ah (NGO-yada) ama cid kasta oo kale oo gacan siineysa qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha dhex jooga Soomaaliya. Siyaasadda qaran – Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga soo noqday iyo Barakacayaasha (Siyaasadda Qaran)– waxaa ay kala qoondeyneysaa doorarka iyo mas'uuliyadaha dhamman heerarka dawladeed ee Soomaaliya, Qaramada Midoobey (QM), la-hawlgalayaasha caalamiga ah, deeq-bixiyeyaasha iyo bulshooyinka uu barakacu saameeyey ee Soomaaliya.

### 1.1 Himilada Siyaasadda Qaran

Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya, waxaa iyada oo aqoonsan baaxadda barakaca iyo qaxootiga ku soo noqonaya Soomaaliya gudaheeda, waxaa ay diyaarisey siyaasad ay ku dooneyso joojinta silica haysta qaxootiga soo noqdey, barakcayaasha iyo bulshooyinka martigeliyey, gaar ahaannna haweenka iyo carruurta, waayeelka, dadka naafada ah iyo agoonta jilicsan. Siyaasaddan qaran waxaa ay doonaysaa xallinta barakaca iyada oo qayb ka ah dadaalka xasilinta dalka, nabad-dhisidda, dhiirrigelinta dib-u-heshiisinta iyo isku-tiirsanaanta bulshada, iyo dib-u-dhiska dhaqaale ee dalka. Waxa ay kordhinayaa adkeysiga bulshada, gaar ahaan qaxootiga soo noqdey iyo barkacayaasha si ay dib ugu billaabaan noloshooda si bedqab iyo sharaf ay ku dheehan tahay iyo iyaga oo si buuxda u helaya xuquuq la mid ah kuwa ay helaan dhammaan muwaadiniinta kale ee Soomaaliya.

### 1.2 Yoolka Siyaasadda Qaqan

Yoolalka siyaasaddan qaran waa in uu aqoonsado hay'adaha ay tahay in la dhiso lana xoojiyo si xalal waara loogu helo gacansiinta qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha Soomaaliyeed, iyo in la aqoonsado doorarka iyo mas'uuliyadaha ay kala leeyihiin hay'adaha qaran iyo kuwa caalamiga ah, hay'adaha bani'aadamnimada iyo kuwa horumarinta iyo daneeyeyaashe kale ee ku hawlan gacansiinta qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha.

### 1.3 Ujeeddooyinka Siyaasadda Qaran

Ujeeddooyinka Siyaasadda Qaran waa kuwan soo socda:

1. Bixinta sal laga wada duulo iyo hagidda siyaasadda si ay u fududeyso hawlaha lagu doonayo in looga hortago barakac cusub ama barakac hor leh oo ay barakacaan qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha iyada oo la sii wanaajiyo xaaladahooda nololeed iyo iyada oo gacan laga siinayo xaqiijinta iyo helidda xuquuqahooda, iyo xallinta barakaca dabadheer iyada oo la

aqoonsanayo cabbirrada iyo tallaabooyinka siyaasadeed oo lagu abuurayo xaalado keeni kara xalal loo helo qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha.

2. Xoojinta kartida hay'adaha dawladda ee heer qaran iyo kuwa Dawlad-goboleeyada iyo kuwa Ma amulka Gobolka Banaadir, iyaga oo awood loo siinayo in ay qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha ay gacan ka siiyaan xaqiijinta xalal waara.
3. Bixinta siyaasadda guud ee loo baahan yahay si ay hay'adaha ay gacan uga siiso in ay gargaar taabogal ah gaarsiiyaan bulshooyinka uu barakacu saameeyey.
4. Sii-wanaajinta amniga iyo bedqabka dadka ay khuseyso, sii wanaajinta nabad-dhisidda iyo dib-u-heshiisiinta, iyo wax ka qabashada sababaha aasaasiga ah ee keena barakaca si looga hortago ama loo khafiifiyo barakaca gudaha dalka ee dadka Soomaaliyeed.
5. Bixinta ilaalin iyo taageero la siiyo qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha, iyo xaqiijinta xuquuqahooda ka muwaadiniin Soomaaliyeed ahaan.
6. Gacan-ka-geysashada dejinta iyo dib-u-dhexgelidda qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha Soomaaliya si loo gaaro xalal waara.
7. Korjoogteynta, kormeeridda iyo isuduwidda hay'adaha bani'aadamnimada iyo kuwa horumarinta inta ay adeegyo taabogal ah siinayaan shakhsiyaadka ay khuseyso.
8. Hubinta in dhammaan qorsheyaasha yareynta saboolnimada iyo kuwa horumarinta ay sidoo kale wax ka qabtaan baahiyaha ayna ilaaliyaan xuquuqaha qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha, ayna awood u siiyaan dhexgalka bulshada.

## 1.4 Baaxadda iyo qaabka guud ee siyaasadda qaran

Siyaasadda qaran waxaa ay qabataa waxyaabahan soo socda:

1. Aqoonsashada dhammaan sababaha keena barakaca ee Soomaaliya, oo ay ka mid yihiin colaad hubeysan, nabadgelyo-xumo iyo gacan ka-hadal dhex mara qabaa'ilka, iyo raadka ay reebaan aafooyinka dabiiciga ah iyo is-beddelka cimilada, dhul-ka-kicinta ay sababaan mashaariicda horumarinta iyo dhul-ka-kicinta sharci-darrada ah.
2. Qiridda xuquuqda qaxootiga iyo barakacayaasha ay u leeyihiin codsashada iyo helidda gargaar iyo ilaalin iyo sidoo kale taageero ku wajahan helidda xal waara oo loo helo barkacooda.
3. Aqoonsashada mas'uuliyadda iyo ballanqaadka dawladda ee ku aaddan ka-hortaggidda iyo ka ilaalinta muwaadiniinteeda ee barakaca, dejinta qorshayaal ku-talogal ah iyo sameynta qaabab digniino hore bixiya oo looga hortagayo waxyaabaha sababa barakaca ama lagu khafiifinayo cawaaqibka ka dhasha, iyo raadinta xalal waara oo loo helo barakaca kuwaas oo ah kuwo la joogteyn karo oo ixtiraamaya arrimaha mudnaanta u leh iyo waxyaabaha ay ku haminayaan

bulshooyinka uu saameeyey barakaca.

4. Aqoonsashada in qaababka kala duwan ee barakaca gudaha uu u baahan karo xalal kala duwan oo loo diyaariyo dhammaan qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha, iyaga oo aan la kala soocin.

5. Aqoonsashada in mas'uuliyadda aasaasiga ah ee dhammaan heerarka  kala duwan ee dawladeed uu yahay bixinta gacan-qabasho, taageero muddada fog ah iyo ilaalin taabogal ah oo ay siiyaan barakayaasha Soomaaliya gudaheeda ku sugan iyo qaxootiga soo noqdey, iyada oo aan loo eegeynin sababta keentey barakacooda iyo in qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaashaasi ay ku nool yihiin xerooyin (degsiimooyin) iyo in kale, ay u nool yihiin shakhsi ahaan ama ay la nool yihiin qoysas martigeliyey, ay ku nool yihiin miyi ama magaalo, ay joogaan gobolka ay asal ahaan ka soo jeedaan ama meel kale oo dalka mid ah.

6. Aqoonsashada baahida loo qabo dadaallo wadajir ah oo la iskuduwey, oo xooggan oo taabogalna ah oo ay sameeyaan hawl-wadeennada bani'aadamnimada, horumarinta, xuquuqaha aadanaha iyo nabad-dhisidda kuwaas oo wax looga qabanayo xaaladda adag ee barakaca ee Soomaaliya.

7. Aqoonsashada hawl-wadeennada heer qaran iyo kuwa heer caalami oo hawshoodu tahay ama awood u leh oo doonayana in ay hirgeliyaan siyaasaddan iyo korjoogteynta hirgelinteeda, isaga oo dejinaya doorarka iyo mas'uuliyadaha ay kala leeyihiin.

8. Aqoonsashada doorka hoggaamineed ee Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya ay ku leedahay qaabeynta siyaasadaha, iyo doorrarka hirgelineed ee Dawlad-goboleedyada, Maamulka Goboka Banaadir iyo dawladaha hoose ay ku leeyihiin wax ka qabashada baahiyaha ilaalinta iyo gacan-qabashada qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha, iyo muhiimadda ay leedahay xoojinta hay'adaha u habboon ee dawlad-goboleedyada.

9. Bixinta meel ay ka wada ambaqaadaan dhammaan hawl-wadeennada heer qaran, degaan iyo heer caalami ee ku hawlan dadaallada ku wajahan ka-hortagga, u-diyaar-garowga iyo wax-kaqabashada xaaladaha barakaca iyo sidoo kale raadinta xalal waara oo loo helo qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha.

10. Aqoonsashada in dhammaan gargaarka bani'aadamnimo loo fuliyo si waafaqsan mabaa'diida aadanenimada, sharafta, dhexdhexaadnimada, daah-furnaanta, isla-xisaabtanka iyo takoor la'aanta.

11. Aqoonsashada in xalalka waara ee qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha ay waajib tahay in lagu daro arrimaha mudnaanta leh, istiraatiijiyadaha iyo siyaasadaha Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya, Dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir, iyada oo islamarkaana la ilaalinayo xuquuqaha qaxootiga soo noqdey iyo barkacayaasha iyaga oo ah muwaadiniin dhab ah oo uu siinayo sharciga.

### 1.5 Shuruucda Qaran iyo Kuwa Caalamiga ah ee kaabaya siyaasaddan

b. Marka ay ku dhaqmayaan ayna hirgelinayaan siyaasaddan maamullada heer qaran, heer gobol iyo heer degaanba waa in ay u hoggaansamaan heshiisyada caalamiga ah iyo kuwa goboleed ee ay ansaxisey Dawladda Federaalka Soomaaliya, iyo dhabbe-tusayaasha kale ee u habboon ilaalinta iyo si habboon ula dhaqmidda qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaas-ha, sida:

- Dastuurka Qaran ee Soomaaliya, dhammaan shuruucda kale ee u habboon, Siyaas daha iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka ee  Soomaaliya;
- Heshiiskii 1951 ee la Xiriirey Xaaladda Qaxootiga iyo borotokoolkiisii soo baxay 1967;
- Heshiiskii OAU (*Ururka Midnimada Afrika)* ee lagu Maamulayo Arrimo Gaar ah oo la xiriira Dhibaatooyinka Qaxootiga jooga Afrika Dhexdeeda;
- Axdiga Afrika ee Xuquuqaha Aadamaha iyo Dadka ee soo baxay 1981;
- Heshiiska Midowga Afrika ee Ilaalinta iyo Gacansiinta Barakacayaasha jooga Afrika gudaheeda ee soo baxay 2009;
- Mabaa'diida Qaramada Midoobey ee Hagaya Barakaca Gudaha ee soo baxay 1998;
- Axdiga Afrika ee Xuquuqaha iyo U-samafalka Carruurta;
- Sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ee uu bixinayo Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha  Madaniga ah iyo kuwa Siyaasadda ee soo baxay 1966, iyo Hes hiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Dhaqaale, Bulsho iyo Dhaqan iyo borotokoolla dooda hagaya hawlgelintooda;
- Sharciga caalamiga ah ee xeerarka dagaalka , ee ay bixinayaan Heshiisyadii Geneve ee Afarta ahaa ee soo baxay 1949 iyo borokoolladii ka dambeeyey ee soo baxay 1977;
- Heshiiskii Qaramada Midoobey ee Xuquuqaha Carruurta ee soo baxay 1988 iyo borokoolladiisii so baxay 2000; iyo
- Heshiiska Baabi'inta Dhammaan Noocyada Takoorka Ka Dhanka ah Haweenka ee soo baxay 1979, iyo borolkiiisii dheeriga ahaa ee soo baxay 2000 (oo aaney weli Soomaaliya ansaxin).

t. Siyaasaddan qaran dhexdeeda, ayaa dhammaan arrimaha la halmaala barakaca gudaha iyo raadinta xalal waara oo loo helo qaxootiga soo noqday  iyo barakacayaasha waxaa looga gol

leeyahay in wax looga qabto qaab iyo hab ay is-dhammeytirayaan qorsheyaasha waaxaha iyo kuwa ka dhexeeya waaxaha kala duwan, waxaana arrimaha qaxootiga soo noqdey iyo baroakacayaasha uu dhex gelinayaa dhammaan arrimaha la xiriira sameynta qorsheyaasha iyo banaamijyada horumarinta ee dhammaan heerarka kala duwan ee Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya, si waafaqsan Qorshaha Horumarinta Qaranka.

## CUTUBKA 2AAD – MABAA'DIIDA HAGAYA SIYAASADDAN

### Mabda'a 1aad: Siyaasadda

Mabaa'diidan waa in ay u hoggaansamaan dhammaan hay'adaha dawladda federaalka, maamul-lada dawladeed ee Dawlad-goboleedyada, Maamulka Gobolka Bannaadir, ururrada maxalliga ah, ganacsiga gaarka loo leeyahay, hay'adaha gargaarka bani'aadamnimada iyo kuwa horumarinta, iyo la-hawlgalayaasha kale ee caalamiga ah, waana in loo higeliyaa si aan wax takoor ah lahayn.

### Mabda'a 2aad: Ka-ilaalinta xoog ku-barakicin

1. Muwaadin kasta oo ku nool Soomaaliya waxaa uu xaq u leeyahay in laga ilaaliyo in xoog looga barakiciyo gurigiisa, gobolkiisa ama degaanka uu caadi ahaan deggan yahay.
2. Xoog ku-barakicinta la mamnuucay waxaa ka mid ah barakac ay sababeen:

b. siyaasado la xiriira qabiilka ay ka tirsan yihiin dadweynaha uu saameeyey;

t. mashaariicda horumarinta ee aan loo haynin qiil iyo daliil lagu qanco iyo in ay dadweynaha ugu jirto dan guud oo ka muhiimsan danta gaarka ah, taas oo ay go'aamiyeen hay'adaha awoodda u leh ayna haddii loo baahdo dib-u-eegis ku sameyso maxkamad dhex-dhexaad ah;

j. dadweynaha oo laga barakiciyo guryahooda iyo meelaha ay deggan yihiin, haddii bedqab-ka iyo amniga dadka ay arrintu saameysey aysan waajibineynin in laga saaro meesha;

x. colaad hubeysan, haddii amniga dadweynaha oo la halmaala ama sababo mileteri oo muhiim ah aaney sidaa keenin, kuwaas oo waafaqsan sharciga xeerarka dagaalka;

kh. ciqaab-wadareed iyo xadgudubyada kale ee xuquuqaha aadaaha; iyo

d. ka-kicinta shakhsiyaad, qoysas ama bulshooyin laga kiciyo guryo ama dhul ay deggan yihiin, iyaga oo aan la siinin ama heli karin ilaalin ku habboon dhinac sharciga ama nooc kale ah.

r. Barakicintu waa in aaney ka dheeraan waqtiga ay u baahan yihiin xaaladaha jira.

### Mabda'a 3aad: Ilaalinta marka uu jiro barakaca

1. Shakhsiyaadka barakacay waa in ay helaan ilaalin buuxda, gaar ahaan waa in laga ilaaliyo dhibaateynta noocyadeeda kala duwan oo ay ka mid tahay jarjarid, jir-dil, xaalado bahalnimo ah, la-dhaqan ama ciqaab bani'aadamnimo-ka-baxsan ama sharaftir ah, iyo dhibaato kale oo anshax-xumo ah oo loo geysto sharaftooda shakhsiga ah, sida falalka tacaddiga galmada ku saleysan oo uu ka mid yahay kufsiga, iyo dhammaan noocyada kale ee weerar fal-xumo ah sida galmo dhiig-miirasho ah ama ku-shaqeysi xoog ah. Barakacayaasha waa in sidoo kale laga ilaaliyaa xadgudubyada ku xusan sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada oo ay

ka mid yihiin:

b. weerarro toos ah ama aan loo meel-dayin ama falal kale oo gacan-ka-hadal ah;
t. gaajeysiin ama kufsi oo loo adeegsado hub-dagaal ahaan;
j. qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha oo loo adeegsado ujeeddooyin mileteri oo ay ka mid yihiin weerarro toos ah iyo sidoo kale in loo adeegsado gaashaan ahaan si guul loogu gaaro ama caqabad loogu noqdo hawlgallo mileteri;
x. falal gacan-ka-hadal ah oo looga danleeyahay argagaxinta qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha, ama guud ahaanba dadweynaha; iyo
kh xuquuqda carruurta, oo ay ka mid yihiin carruurta qaxootiga soo noqdey ama barakacayaasha ah, oo ay tahay in laga ilaaliyo in ay askareeyaan ayna adeegsadaan dhinacyada ay colaaddu ka dhaxayso.

2. Qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha waa in laga ilaaliyo soo qabasho iyo xirid takoor ku dhisan ama aan sharci ku dhisneyn iyada oo sababta loo beegsanayana ay tahay xaaladdooda barakac daraaddeed.
3. Qaxootiga soo noqdey iyo barakacyaasha waa in la siiyaa gargaarka degdegga ah ee lagamamaarmaanka ah (tusaale ahaan, biyo, cunto, hoy, daryeel caafimaad iyo baahiyaha kale ee aasaasiga ah) inta uu barakacu jiro.

## Mabda'a 4aad: soo-noqosho khiyaari ah iyo u-madax-bannaanshaha kala doorashada xalal

1. Dhammaan hay'adaha dawladda, maamullada dawladeed ee Dawlad-goboleeyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir ayay waajib ku tahayna ayna mas'uuliyad aasaasi ah ay ka saaran tahay abuurista xaalado, iyo sidoo kale bixinta wasaa'il, qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha u oggolaanaya in si xor ah oo ogaal ku dhisan ay u doortaan in ay si khiyaari ah, bedqab ku dhisan oo ay sharafi ku dheehan tahay ugu soo noqdaan guryahooda iyo goobaha ay caadi ahaan deggan yihiin, ama ay ku milmaan degaanka ay joogaan ama ay si iskood ah u degaan qayb kale oo dalka ka mid ah.
2. Qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha Soomaalida ah waxaa ay xaq u leeyihiin in ay si khiyaarkooda ah ugu noqdaan degaankii ay asal ahaan ka soo jeedeen ama ay degaan meel un ka mid ah dalka, ay ku noolaadaan si sharaf, ixtiraam, barwaaqo iyo xorriyad ku saleysan.
3. Dhammaan dhinacyada ay khuseyso waa in ay bixiyaan dadaallo gaar ah oo ay ku hubinayaan in si buuxda ay qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha ay laf-ahaantooda uga qaybqaataan qorsheynta iyo maareynta noqoshada, ku-milmidda degaanka ama degidda meel kale oo ka mid ah dalka.

### Mabda'a 5aad: Xoriyadda dhaqdhaqaaqa iyo doorashada halka ay degayaan

1. Qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha waxaa ay:

b. xaq u leeyihiin in ay ka shaqeeyaan bedqabkooda iyo wanaaggooda, iyo in ay go'aansadaan halka ay degayaan iyo in si xor ah ugu dhex socdaalaan dalka, iyada oo aan loo eegin qabiilkooda, xaaladdooda socdaal, jinsigooda iyo shuruudo kale toona;

t. xaq u leeyihiin in ay ka tagaan dalkooda ayna nolol u raadsadaan dal kale;

j. xaq u leeyihiin in ay magangelyo u doontaan dal kale; iyo

x. xaq u leeyihiin in aan khasab lagu soo celin ama la dejin meel ay halis ku gelayaan noloshooda, bedqabkooda, sharaftooda, xorriyaddooda ama caafimaadkooda, si waafaqsan sida ay dhigayaan jaangooyooyinka caalamiga ah.

Kh. Waa in aan qaxootiga soo noqdey iyo barakacyaasha lagu takoorin barakacooda. Waa in ay helaan xuquuqda ay u leeyihiin in ay si buuxda uga qaybqaataan dhammaan heerarka kala duwan ee arrimaha bulshada iyo in ay sida dadka kale ay u heli karaan adeegyada bulshada ee lagu bixiyo degaanka ay degsiimooyinka ay deggan yihiin ay ku yaallaan.

d. Waa in maamullada dawladeed ee heer federaal iyo heer dawlad-goboleed ay gacan ka geystaan xaqiijinta xaaladda iyo halka ay joogaan barakacayaasha la soo sheegey in aan meel lagu ogeyn, ayna iskaashi kala yeeshaan hay'adaha caalamiga ah ee u habboon ee arrimhaas ku hawlan. Waa in si joogto ah ay dadkaas qaraabadooda ugu soo gudbiyaan halka uu marayo baaritaanka ayna ogeysiiyaan wixii natiijo ah ee ka soo baxa.

### Mabda'a 6aad: Xuquuqda heer nololeed oo caadi ah

1. Dhammaan qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha waxaa ay xaq u leeyihiin, sida muwaadiniinta kaleba, heer nololeed caadi ah, iyada oo aan loo eegeynin xaaladaha jira waana in iyada oo aan la takoorin la siiyaa:

    b. cunto iyo biyo la cabbi karo oo ku filan;

    t. hoy aasaasi ah;

    j. adeegyo caafimaad iyo fayadhowr aasaasi ah;

    x. waxbarasho aasaasi ah; iyo

    kh. amni shakhsi-ahaaneed.

2. Dhammaan hawl-wadeennada ku hawlan bixinta adeegyada lagu xusey Mabda'a 6aad, qodob-

kiisa 1aad, waa in ay bixiyaan dadaallo gaar ah oo ay ku hubinayaan in ay haweenka si buuxda uga qayb-qaataan go'aamada la qaadanayo iyo qaybinta waxyaabaha aasaasiga ah ee la bixinayo.

### Qodobka 7aad: Shakhsiyaadka nugul iyo shakhsiyaadka naafada ah

1. Qaar ka mid qaxootiga iyo barakacayaasha (tusaale ahaan, carruurta, gaar ahaan carruurta aan lala socon; haweenka xaamilada ah; hooyooyinka haysta carruur aad u yaryar; qoysaska ay haweeney hormuud u tahay; qoysaska ay carruuri hormuud u tahay; agoomaha; shakhsiyaadka naafada ah iyo ama qaba cudurrada dabadheer; dadka waayeelka) waa in la siiyaa ilaalinta iyo gacanta ay u baahan yihiin xaaladda ay ku sugan yihiin daraaddeed, iyo in loola dhaqmo qaab ku xisaabtamaya baahiyahooda gaarka ah.
2. Dadka xanuunsan ama buka, dadka naafada ah iyo dhammaan shakhsiyaadka kale ee nugul waa in ay helaan daryeel caafimaad, u-dhug-lahaansho iyo sahayda kale ee aasaasiga u ah illaa inta ugu badan ee suuragalka ah iyo sida ugu dhaqso badan ee suuragalka ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin baaritaan ku ogaanshaha iyo daaweyta cudurrada faafa.
3. Waa in dareen gaar ah loo yeeshaa baahiyaha caafimaad, taas oo ay ku jirto helidda daryeelka caafimaad ee u gaarka ah haweenka iyo gabdhaha. Tani waa in ay ka mid ahaataa daryeel caafimaad iyo sidoo kale u-dhimrinta ku habboon dhibbanayaasha loo geystey tacaddi galmo iyo xadgudub kale.
4. Waa in dareen gaar ah loo yeeshaa in laga hortago in cudurrada la isu gudbiyo ee faafa oo uu ka yahay HIV/AIDS-ka ay ku faafaan qaxootiga iyo barakacaasha dhexdooda.
5. Waa in adeegyo muddada dheer la bixiyo oo loogu talogaley la siiyaa dadka qaba cudurrada dabadheer, oo uu ka mid yahay cudurka dhimmirka ku dhaca.

### Mabda'a 8aad: Dokumenti-gareynta qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha

1. Dawladda Federaalka Soomaaliya waa in ay hubisaa in qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha ay u sameyso dhammaan dokumentiyada lagama maarmaanka u ah helidda iyo ku naallooshada xuquuqahooda sharciga ah (tusaale ahaan, baasaboorrada, dokumentiyada aqoonsiga shakhsiga ah, iyo shahaaddooyinka dhalashada iyo guurka). Gaar ahaan, maamulladu waa in ay fududeeyaan in la siiyo dokumentiyo cusub ama loo beddelo dokumentiyadii ka lumey intiii ay barakaca ku jireen, iyada oo aan la saarin shuruudo aan caqligal ahayn sida in qofka lagu xujeeyo in uu ku noqdo degaankii uu caadi ahaan degganaan jirey si uu u helo dokumentiyada uu u baahan yahay, ama in la saaro kharash aaney iska bixin karin.
2. Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya waa in ay sidoo kale hubisaa in qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaashuba ay raadsan karaan ayna heli karaan beddelka waraaqihii lahaan-

shaha dhulka, shahaaddooyinkooda waxbarasho iyo dokumentiyada kale ee muhiimka ah.

3. Waa in haweenka iyo ragga ay xuquuq isku mid ah u lahaadaan helidda dokumentiyadaas lagama maarmaanka ah, waana in dokumentiyadaas ay ku soo baxaan magacyadooda oo keliya.
4. Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya waa in ay sidoo kale hubisaa in qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha si caqabad la'aan ah oo ay u siman yihiin ay u soo gaari karaan goobaha dokumentiyada u habboon lagu bixinayo.
5. Marka uu jiro khilaaf sharciga la xiriira, qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha waa in ay si isku mid ah ula xiriiri karaan garsoorka, si la mid ah sida muwaadiniinta kale ee Soomaaliya, iyada oo aan wax loo dhimin.
6. Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxaa ay aqoonsan tahay in siyaasaddan aaney qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha siineynin maqaam/xaalad sharci ama maamul oo gaar ah sababta oo ah waa muwaadiniin ama dad caadi ahaan deggan Soomaaliya. Sidoo kale in xaaladdooda loo adeegsado in lagu takooro arrimaha la xiriira caddaaladda ama helidda adeegyada.
7. Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxaa ay sidoo kale aqoonsan tahay in siyaasaddan aaney u-qiil-bixineynin in si guud loo diiwaangeliyo barakacayaasha. Diiwaangelinta barakacayaasha waa in la sameeyaa keliya haddii ay xiriir la leedahay hadaf gaar ah, sida bixinta gargaar.

### Mabda'a 9aad: In aan la takoorin qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha

1. Qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaashaba, haddii ay ku nool yihiin xerooyin iyo haddii kaleba, waa in aan laga takoorin helidda xuquuqahooda, ay ka mid yihiin kuwa hoos lagu taxay, takoorkaas oo ka dhashey barakacooda:

b. xuquuqda xor u-ahaanshaha fikirka, iimaanka, hadalka iyo ra'yiga;

t. xuquuqda helidda waxbarasho, caafimaad iyo caddaalad, iyo dhammaan xuquuqaha kale ee Dastuurka Qaran ee Soomaaliya iyo shuruucda caalamiga ah ay bixinayaan;

j. xuquuqda lahaanshaha dhul iyo hanti;

x. dadaallo gaar ah oo lagu bixiyo hubinta in haweenka iyo gabdhaha ay si caqabad la'aan ah u heli karaan waxbarasho;

kh. xuquuqda raadsashada fursado shaqaaleyn iyo ka-qaybgelidda hawlaha dhaqaale ee dalka;

d. xuquuqda xor-u-ahaanshaha in ay cidda ay rabaan la xiriiraan (*to freely associate*) iyo in ay si la mid sida dadka kale ay uga qaybqaataan arrimaha bulshada;

r. xuquuq u lahaanshaha cod-bixinta iyo ka-qaybgalka arrimaha dadweynaha iyo arrimaha dawladeed;

s. xuquuq u lahaanshaha in ay in ay farriintooda ku gudbiyaan luuqadda ama qaabka hadalka ay fahmi karaan; iyo

sh. xuquuq u lahaanshaha in ay si xor ah ugu dhex-socdaali karaan guud ahaan dalka.

**Mabda'a 10aad: isuduwidda wada-hawlgalayaasha dawladda iyo kuwa caalamiga ah iyo deeq-bixiyeyaasha**

1. Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliyaa waa in si dhow ay xiriir isuduwid ay hay'adaha bani'aadamnimada ee caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah iyo hawl-wadeennada kale ee ku habboon ula yeelataa marka ay gudanayaan waajibaadyadooda hawleed si ay galaangal degdeg ah oo aan caqabado ku gudbaneyn ugu helaan qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha, si ay gargaar u siiyaan dadka ay arrintu saameysey. Dawladdu waxaa ay ixtiraami doontaa mabaa'diida bani'aadamnimada ee aadannenimada, dhex-dhexaaadnimada iyo madax-bannaanida.

2. Dhammaan hay'adaha dawladda iyo ururrada caalamiga ah waa in ay ixtiraamaan ayna hubiyaan in waajibaadyadooda ay u gutaan si waafaqsan sharciga caalamiga ah, Dastuurka Qaranka Soomaaliyeed, siyaasaddan qaran, sharuucda qaran iyo kuwa caalamiga ah ee xuquuqaha aadamaha iyo sharciga bani'aadamnimada. Dhammaan arrimahan waxaa xaalad kasta ha jirtee loo ixtiraamayaa iyada oo si taxaddar iyo caqli ku dheehan loo raacayo loona hirgeliyo dhabbe-tuseyaasha ku jira siyaasaddan, si looga hortago loogana fogaado xaalado horseedi kara barakac.

3. Shakhsiyaadka ku hawlan gargaarka bani'aadamnimada ee la siiyo qaxootiga iyo barakacayaasha jooga Soomaaliya waa in la ixtiraamaa waana in la ilaaliyaa hantidooda. Waa in aan lagula kicin wax weerar ah ama tacaddi/gacan-ka-hadal ah.

4. Hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa bani'aadamnimada iyo hawl-wadeennada kale ee u habboon waxaa ay xaq u leeyihiin in ay bixiyaan adeegyadooda ay ku taageerayaan qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha. Adeeg-bixinta noocaan ah waa in loo arkaa in uu yahay fal niyad-wanaag ah. Oggolaanshaha loo oggolaanayo adeeg-bixintaa waa in aan si sabab la'aan ah looga maagin, gaar ahaan marka maamullada ay khuseyso aaney awoodin ama aaney dooneynin in ay iyagu bixiyaan gargaarka bani'aadamnimada ee loo baahan yahay.

5. Dhammaan maamullada dawladeed waa in ay u oggolaadaan in gargaarka bani'aadamnimada uu si xor ah u maro iyo in shakhsiyaadka ku hawlan bixinta gargaarka noocaas ah ay u

oggolaadaan in ay si degdeg ah oo caqabad la'aan ah ay u gaaraan qaxootiga iyo barakacayaasha.

6. Dhammaan maamullada dolwadeed waa in ay shakhsiyaadka ku hawlan bixinta gargaarka bani'aadamnimada ay siiyaan dal-ku-galka iyo rukhsadaha lagama maarmaanka ah ee ay ugu baahan yihiin ka soo bixidda hawshooda.

## Mabda'a 11aad: Qorshe ku-talogal ah iyo gurmad degdeg ah

1. Hay'adaha QM, ururrada bani'aadamnimada, hawl-wadeennada horumarinta (oo ay ka mid yihiin NGO-yada degaanka iyo kuwa caalamiga ah), iyo maamullada qaran iyo kuwa dawlad-goboleedyada waa in ay diyaariyaan qorsheyaal ku-talogal ah oo loo dhigayo xaalad degdeg ah oo sababeysa barakac qaybo dadweynaha ka mid ah, si ay awood ugu yeeshaan in si dhakhso badan ay wax uga qabtaan xaaladaha degdegga ah. Waa in ay sidoo kale maalgeliyaan lafaguris waaxo kala duwan ay wadajir u qabanayaan iyo hawlgallada goor hore la sameeyo ee loo baahan yahay si loo fududeeyo geeddi-socodyada xalalka waara iyo adkeysiga.
2. In waqtigii ku habboonnaa wax laga qaban waayo xaalad degdeg ah waxaa ka dhalan karta in ay raad xun ku yeelato dadweynaha oo ay ka mid yihiin qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha; sidaa daraaddeed, haddii lala daaho ama aan wax laga qaban, maamullada dawladda ee ay khuseyso waa in ay sameeyaan baaritaanno dheeri ah oo lagu ogaanayo sababaha keeney oo waxna looga qabanayo caqabadaha hortaagan in si taabogal ah wax looga qabto.
3. Waa in dhammaan dhinacyadu ay:
   - b. maalgeliyaan qorshe-hawleedyo iyo laguris wadajir loo sameeyo oo ku aaddan gurmadka degdegga ah iyo xalal hore oo degaan gaar ah ku wajahan iyaga oo kaashanaya maamullada dawladeed ee u habboon;
   - t. diiradda saaraan dejinta istiraatiijiyado la-qabsi iyo tallaabooyin ku aaddan muddada fog oo bulshooyinka gacan ka siin kara in ay la qabsadaan raadka ay reebaan abaaraha soo noqnoqda iyo aafooyinka kale ee dabiiciga ah; iyo
   - j. isuduwaan qaabab lagu wadaago macluumaadka digniinta hore iyo lafagurista xaaladda, si loo helo macluumaad joogto ah oo dhammaan dhinacyadu ay u adeegsan karaan qaabeynta waxqabadyadooda.

## CUTUBKA 3aad: XALAL WAARA: KHARIIDADDA WADDADA LOO MARAYO JOOJINTA BARAKAC KA DHACA SOOMAALIYA

Dawladda Federaalka Soomaaliya, heer qaran ahaan, iyo heerarka dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir, waxaa ay ogsoon yihiin in mas'uuliyaddooda aasaasiga ah ay tahay in ay xalal waara u helaan qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha, si ay u awoodaan in ay xuquuqahooda iyo adeegyada la xiriira u helaan si aan lahayn takoor ka dhashey barakacooda.

### 1.2 Xalal waara: jaangooyooyinka iyo geeddi-socodyada

Maamullada iyo hawl-wadeennada kale ee lagu xusey Cutubka 4aad ee siyaasaddan ayaa qirsan in gaaridda xalal waara ay ku imaaneyso geeddi-socod dheer oo kakan. Si loo taageero oo looga shaqeysiiyo geeddi-socodkan la xiriira qaxootiga iyo barakacayaasha, waxaa la raacayaa jaangooyooyinka iyo geeddi-socodyadan soo socda:

1. xal waara waxaa lagu gaari karaa:

b. ku soo noqoshada iyo dib-u-dhexgalka guryahoodii ama goobihii ay caadi ahaan deggenaan jireen, marka ay dadku yihiin xoolo-dhaqato, meelihii ay ku noolaan jireen;

t. ku-milmidda bulshada degaanka; iyo

j. degidda iyo dhexgelka meelo kale oo Soomaaliya ka mid ah, oo ay ka mid tahay in si abid ah meel kale ay u degaan.

2. Qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaashu waxaa ay xaq u leeyihiin in ay go'aan khiyaari ah oo ogaal ku dhisan oo ku saabsan mustaqbalkooda iyo nooca xalka waara ee ay ku doonayaan. Marka ay arrintu sidan tahay, qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha waa in la siiyaa macluumaad u habboon oo saxna ah oo ku saabsan noocyada ay kala dooran karaan iyo macluumaad ku saabsan xaaladda ka jirta degaankooda ama degaannada lagu talojiro in la geeyo. Intaa ka sokow, qaxootiga Soomaaliyeed ee ku nool dalal kale waxaa ay xaq u leeyihiin in ay soo galaan Soomaaliya si ay u helaan macluumaadka u habboon ee saxda ah ee ku saabsan noocyada fursadaha u furan iyo xaaladda ka jirta dalkooda ama degaannada loo wado, ayna ku soo noqdaan dalkii ay qaxootinimada ku joogeen ka hor inta aan go'aan kama-dambeys ah ku gaarin in ay ku noqdaan Soomaaliya iyaga oo ah qaxooti dalka ku soo noqdey.

3. Maamullada iyo hawl-wadeennada lagu xusey Cutubka 4aad waa in ay ka fogaadaan in ay si toos ah iyo si aan toos ahaynta ugu qasbaan ama u billaabaan ku celinta ama geynta degaanno ay nolosha, bedqabka, xorriyadda ama caafimaadka qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaaashu ay halis ku gelayaan.

4. Maamullada iyo hawl-wadeennada kala duwan ee ku xusan Cutubka 4aad waa in ay taageeraan

qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha oggol oo awoodana in ay si khiyaarkooda ah u noqdaan iyada oo aan la dhiirrigelineynin lana qalqaalineynin in ay ku noqdaan degaanno aan amnigooda fiicneyn. Noqoshada noocaas ah waa in la korjoogteeyaa waana in ay la socdaan ugu yaraan waxyaabahan:

b. taageero dhinaca nooliga gaadiidka ah oo loogu talogaley inta ay dhexda ku sii jiraan, oo ay ka mid yihiin baabuur raaca iyo waxyaabaha kale ee loogu baahan yahay safarka, oo ay ka mid yihiin cuntada iyo biyaha;

t. gargaar cunto oo ugu yaraan hal sano oo ka bilaabma ka dib marka ay yimaadaan halkii ay ku socdeen, si loo hubiyo in dadka ay maciishaddooda u billaabi karaan si taabogal ah;

j. agabka aan cuntada ahayn iyo hoy ku-meelgaar ah;

x. agabka iyo qalabka dhismaha ama taageero maaliyadeed oo la siiyo barakacayaasha degaankooda ku noqonaya si ay ugu dhistaan guryahooda; iyo

kh. taageero ay ku billaabaan maciishad ay ku noolaadaan.

5. Barakaca gudaha waxaa uu dhammaadaa marka qaxootiga soo noqdey iyo barkaacayaasha ay helaan xal waara oo lagu sargooyey cabbiraadaha loogu dhigey qaybta (Qabyta 3.2). Sidaa daraaddeed guusha laga gaaro xal waara waxaa korjoogteeya oo qiimeeya Hay'adda Qaranka ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha / *National Commission for Refugees and IDPs* (NCRI), oo la tashanaya hay'adaha bani'aadamnimada iyo kuwa horumarinta iyo bulshooyinka uu barakacu saameeyey, si uu u xaqiijiyo xaaladaha, uga soo warbixiyana halisaha ilaalinta la xiriira, u khafiifiyo halisaha uuna uga hortago barakac cusub oo dhaca.

6. Siyaasaddan ayaa hagi doonta waxyaabaha iyo geeddi-socodyada kala duwan ee loogu talogaley xaqiijinta xal waara oo la gaaro. Xalalka waara waa in hor iyo horraanba laga raadiyaa degaannada uu saameeyey barakaca waana in ay ahaadaan kuwo degaanka laga taageersan yahay; sidaa daraaddeed, siyaasaddan waxaa ay dhiirrigelineysaa sameynta iyo maaliyad-siinta qorsheyaal heer degaan ah, kuwaas oo dhaqaale loo sii marin karo sanduuqyada, miisaaniyadaha degmada, iyo dakhliyada heer qaran iyo mid deegaan, ama heli kara taageero dibadeed.

7. Xalalka waara waxaa sidoo kale loo raadin karaa si waafaqsan Qorshaha Waxqabadka Qaranka (*National Action Plan*) iyo iyaga oo ah qodobbo lagu darayo Istiraatiijiyada Qaran ee Xalalka Waara, oo laguna xuso Khariidadda Waddada Horumarka Bulshada (*the Social Developmt Roadmap*), iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka *(National Development Plan*) iyo Qaabka Guud ee Soo-kabashada iyo Adkeysiga ee Soomaaliya (*the Recovery and Resilience Framework for Somalia*).

## 1.3 **Xalal waara: shuruudaha iyo tallaabooyinka taageerada ah**

Maamullada iyo hawl-wadeennada kale ee lagu xusey Cutubka 4aad waa in ay shuruudahan

hoos ku taxan ay u adeegsadaan xal waara oo loo helo qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha.

1. Bedqabka iyo amniga iyo xoriyadda dhaqdhaqaaq ee muddada fog.

Si arrintan loo xaqiijiyo, waa in tallaabooyinka soo socda la qaadaa:

b. Daraaseynta amniga guud iyo xaaladda amni ee degaannada la doonayo in lagu celiyo qaxootiga ama la dejiyo barakacyaaasha, taas oo ay ka mid tahay daraaseynta halista aafada (*disaster risk assessment*), waa in la sameeyo ka hor inta aan laga fekerin soo-celinta iyo dib-u-dejinta;

t. gaadiid badbaado leh waa in la bixiyaa haddii loo baahdo;

j. waa in la korjoogteeyaa dhaqdhaqaaqyada soo-noqoshada iyo dhul kale u guurista (*return and relocation*), waana in dhacdo kasta oo amni oo dhacda lagu wargeliyaa booliska si ay u dabagalaan;

x. ciidamo boolis hubeysan ah waa in la dhigaa degaannada lagu celinayo, bulshada degaanka la dhexgeliyo ama ah meelo  kale oo dalka ka mid ah oo la dejinayo; waa in sameeyaa saldhigiyo iyo rugo boolis ay ka hawlgalaan oo ay soo gaari karaan qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha;

kh waa in degaannada ay saameysey laga saaraa miinooyinka iyo waxyaabaha kale ee aan qarxin, waana in la qabtaa wacyigelin ku aaddan miinooyinka;

d. waa in la qaadaa tallaabooyin lagu hubinayo in qaxootiga soo noqdey iyo barakacyaasha ay caddaalad iyo kaalmo sharci ay ku heli karaan deggaannada ay degaan, si loo helo xal waara oo waafaqsan jaangooyooyinka caalamiga ah;

r. waa in la fududeeyaa dib-u-heshiisiin heer bulsho ah, taas oo ay ka mid tahay dhisidda ama taageeridda guddiga nabadda degmada, joogteynta bulsho dib-u-dhexgelinta ama dhexgelinta qaxootiga iyo barakacayaasha;

s. waa in la ilaaliyaa xoriyadda dhaqdhaqaaqa si loo hubiyo bedqabka iyo amniga, taas oo ay ka mid tahay gaarista iskuullada; tas-hiilaadka biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda; suuqyada; xarumaha caafimaadka; iyo goobaha maciishadda laga helo;

sh. waa in la ilaaliyaa in si xor ah loogu socsocon karo maciishad ama dano kale daraadood, taas oo ay ka mid tahay iyada oo loo marayo u sameynta dokumentiyo dad ku filan; iyo

d. waa in tallaabooyinka yareynta halista aafada laga hirgeliyaa degaannada ay aafadu ku soo noqnoqoto; waana in nidaamyo digniin hore bixiya la sameeyo lana hawlgeliyo

si ay u bixiyaan digniin ay ka dhalato in jawaab la bixiyo ka hor in aanu barakac kale dhicin mustaqbalka.

2. Waa in loo dhisaa ama dib loo dhisaa hoy iyo guryo waana in adeegyada aasaasiga ah la bixiyaa si loo hubiyo in heer nololeed caadi ah la helo, taas oo ay ka mid tahay in la helo biyo, cunto, hoy, caafimaad, fayadhowr iyo waxbarasho dad ku filan.

   Si arrintan loo xaqiijiyo, tallaabooyinkan soo socda ayaa la qaadi doonaa:

   b. gargaarka bani'aadamnimada ayaa loo bixin doonaa si waafaqsan baahiyaha bani'aadamnimada ee la soo daraaseeyey, waxaana si tartiib-tartiib ah loo joojin doonaa keliya marka la xaqiijiyo isku-filnaansho;

   t. adeegyada aasaasiga ah ee caafimaadka iyo waxbarashada ee degaannada ay ku noqonayaan ama dib-u-dejin loogu sameynayo qaxootiga iyo barakacayaasha ayaa la abuuri doonaa ama dib-u-dhis lagu sameyn doonaa, waxaana la sii wanaajin doonaa ama la sii ballaarin doonaa kuwa degaannada magaalooyinka ah ee qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaashu ay ku dhex milmayaan dadka degaanka; beddelladda ardayda iskuullada ee dokumentiga leh ayaa la fududeyn doonaa; waxaana la aqoonsan doonaa dibloomayaasha iyo shahaaddooyinka laga soo qaatey dalal kale ama degaanno kale oo dalka ka mid ah;

   j. biyo-mareenno (*waterways*), biyo-qabatinno (*chatchment*) iyo kaabayaasha kale ee noocaas ah ayaa laga sameyn doonaa meelaha aaney hadda ka jirin, ama waa la dayactiri doonaa si ay uga faa'iideystaan dadka iyo xayawaanka;

   x. intii suuragal ah, bulshooyinka uu saameeyey barakaca ayaa laga qaybgelin doonaa dadaallada dhisidda iyo dib-u-dhiska si loo abuuro lahaansho iyo si ay lacag uga soo gasho iyada oo loo marayo barnaamijyada lacag-shaqo-ku-beddelashada (*cash-for-work programmes*); iyo

   kh. Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa isuduwi doonta korjoogteynta sida ay u socdaan tallaabooyinka kor lagu soo xusey ama siyaasadda ama sharci-dejinta kale ee u habboon ee la sameeyo si loo kaabo geeddi-socodyadan; dhammaan hay'adaha fulinaya tallaabooyinkan waxaa ku waajib ah in ay warbixinnadooda korjoogteynta iyo qiimeynta u soo gudbiso Hay'adda NCRI.

3. Dib-u-soo-nooleynta iyo helidda dhulka, guryaha iyo hantida.

   Si loo xaqiijiyo arrintan, waxyaabahan soo socda ayaa la sameyn doonaa:

b. dib-u-soo-nooleynta guryaha, dhulka iyo hantida, iyo hubinta in qaxootiga soo noqdey iyo barakacyaashu ay helaan qaababkan, iyada oo aan loo eegin in ay ku soo noqdeen degaan-

nadii ay asal ahaan ka soo jeedeen iyo in ay ku dhex milmayaan dad deggan degaanno kale; qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha waxaa la siin doonaa kaalmo sharci oo lacag la'aan ah haddii loo baahdo;

t. in magdhow ama dib-u-meeleyn (*relocation)* loo sameeyo qaxootiga soo noqdey ama barkacaayaasha meelihii ay degganaayeen ay ka saarto ciddii sharci ahaan lahayd, haddii cidda ka soo saareysa ay tahay ay tahay shacab ama dawladba;

j. in la bixiyo ballanqaad ay muddo ku degganaan karaan ama la siiyo dokumentiyo muddo sugan ama weligood ay ku degganaan karaan, si loo hubiyo helidda dhul, guri ama ay ka-faa'iideystaan dhulka iyada oo aan halis loo gelin in khasab looga kiciyo ama faragelin kale lagu sameeyo sida ay dhigayaan Habraaca Qaran ee ka Saaridda dadka Hoyga ama Dhulka ay Deggan yihiin (*National Eviction Guidelines*); sidoo kale, qabanqaabooyin dhul lahaansho bulsho ayaa sidoo kale la fududeyn doonaa lana aqoonsan doonaa;

x. in Dawladdu ay dhul siiso ama ay mashaariic guryo kiradoodu yar tahay u sameyso dadka aan dhulka lahayn ama bulshooyinka barkacayaasha ah ee si gaar ah u nugul ee ka mid ah qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha;

kh. soo-celinta xuquuqaha lahaanshaha ama kireystaha ama xaq-u-lahaanshaha in qaxootiga soo noqdey iyo barakayaasha ay guryaha u helaan si la mid ah dhammaan muwaadiniinta kale, iyo in magdhow ku filan la siiiyo mararka aan guryaha, dhulka iyo hantida aan la soo celin karin;

d. aqoonsashada waraaqaha lahaanshaha dhulka ee rasmiga iyo kuwa aan rasmiga ahayn, iyo bixinta habab fudud, la soo wada gaari karo oo lagu xalliyo meelaha la isku qabsado xuquuqaha;

r. haddii ay dhacaan khilaafaad, fududee gaaridda maxkamadaha heerka dawladda federaalka ah iyo heerka dawlad-goboleed, sidoo kale iyada oo la bixinayo kaalmo sharci;

s. degaannadii ay reer-guuraagu ku noolaan jireen oo loo soo nooleeyo bulshooyinka xoolo-raacatada ah, taas oo ay ka mid tahay goob ay si istraatiiji ah ugu socon karaan xoolo-dhaqada, soo-nooleynta dhul-daaqsimeedka iyo meelaha biyaha laga cabbo;

sh. in si rasmi ah loo aqoonsado in si sharci ah ay u lahaan karaan ayna u dhaxli karaan haweenka iyo carruurta qofka ama dadka ku qoran milkiyadda dhulka; iyo

dh. hubinta in tallaabooyinkani ay waafaqsan yihiin Qabanqaabooyinka Ku-meelgaarka ah ee In Dhulka Loogu Qaybiyo qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha xaqa u leh si ay guryo uga dhigtaan ee ay ansaxiyeen Golaha Wasiirrada Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo shuruucda kale ee Soomaaliya.

4. Dib-u-abuurista maciishadaha, shaqaalenimada, abuurista noocyo kala duwan oo maciishad ah iyo ku daridda mashaariicda waxtarka bulshada. Xalalka qaxootiga soo noqdey iyo barak-acayaasha iyo bulshooyinka martigeliyey waa in ay ka mid noqdaan, iyada oo kuwo kalena ay jiraan, maciishado hubin kara joogteynta xalal waara. Xaqiijinta arrintan waxaa ay u baahan tahay waxyaabahan soo socda:

   b. kala duwanaanshaha maciishadaha iyo suuqyada ay gaarayaan;
   t. lafagurista suuqa si loo aqoonsado fursadaha iyo caqabadaha jira;
   j. ku tababaridda xirfado u habboon suuqa geli kara ama bixin kara fursado shaqaaleyn;
   x. dib-u-abuurista nidaam waxbarasho oo shaqeynaya, la gaari karo oo kharashkiisa la iska bixin karo;
   kh. abuurista shabakado isu soo gurmasho iyo kuwo is-gacan-qabasho bulsho oo loogu talogaley ilaalinta bulshada degaannada ay bulshooyinku ay halis ku jiraan ama si joogto ah ama muddo ka dibba ay halis ugu gelayaan dhibaatooyin dabiici ah, si waafaqsan Qorshaha Horumarinta Qaranka (*National Development Plan*) iyo Siyaasadda Qaranka ee Ilaalinta Bulshada *(National Social Protection Policy); iyo*
   d. hay'ad raacsan siyaasadaha maalgelinta ee u xagliya dadka saboolka ah oo ay ka mid yihiin talooyin lagu dabargoynayo saboolnimada oo loogu talogaley qaxootiga iyo barakacayaasha.

Xalalka degaannada miyiga ah waxaa ay u baahan yihiin in waaxda beeraha iyo xoolaha ee Soomaaliya la soo nooleeyo lagana dhigo mid sida hadda ay tahay ka casrisan; qaybahan ayaa ah kuwo aasaasiyan wax ku biiriya haqab-beelka cuntada ee qaranka oo muhiim u ah dib-dhiska dhaqaalaha Soomaaliya. Barnaamijyada maciishadda waxaa soo hoos-geleya waxyaabahan soo socda:

b. bixinta qalab lagu soo nooleeyo dhulkii beeraha;

t. bixinta tababar lagu soo nooleeyo xirfadaha beeraha iyo aqoonta la xiriira qaababka iyo hababka cusub ee beeraha looga shaqeeyo;

j. gashiga beeraha sida abuurka iyo bacrimiyeyaasha oo la bixiyo muddo dad ku filan;

x. dib-u-dhiska kaabayaasha beeraha iyo xoolo-dhaqashada, sida kanaallada biyaha, biyo-qabatinnada iyo goobaha biyaha laga cabbo;

kh. abuurisa nidaam waraab oo yar-yar oo loogu talogaley dhul-beereedka ku yaalla degaannada abaaruhu ay ku soo noqnoqdaan;

d. barnaamijyada lacag-shaqo-ku-beddelashada ee hawlaha dib-u-dhiska;

r. ku tababaridda, u soo-iibinta qalabka iyo rukh-sad-siinta doomaha kalluumeysiga si dib

loogu soo nooleeyo hawlihii kalluumeysiga;

a. u bilaabidda xoolo ku filan xaaladda cimilo iyo carrada degaannada miyiga;

sh. ku-wacyigelinta dadka ee macluumaadka digniinta hore ah iyo in xoolaha tiradooda la yareeyo waqtigii ku habboonaa ka hor waqtiyada abaaruhu ay soo wajahan yihiin, iyo badinta tirada xoolaha ee ka dib marka ay abaartu tagto;

dh. hubinta in si bedqab iyo xornimo leh ay u socdaalaan xoolo-raacatada si ay u gaari karaan dhul-daaqsimeedka iyo goobaha biyaha, iyo si ay u heli karaan adeegyada caafimaadka xoolaha si loo hubiyo caafimaadka xoolaha;

sh. bixinta tababar la xiriira xirfadaha suuq-geynta iyo akhris-qoraalka; iyo

dh. hubinta gaaridda xoolaha iyo suuqyada ganacsiga taas oo ay ka mid tahay iyada oo la bixinayo dameero iyo gaari-dameerro, adeegyada kale ee gaadiidka iyo dhisidda iyo dayactirka waddooyinka soo gala.

Siyaasaddan waxaa ay ogsoon tahay in badi qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaashu ay u badan tahay in maciishad u soo raadsadaan magaalooyinka. Xalalka degaannada magaalooy-inka waxaa ay u baahan yihiin barnaamijyo xirfado lagu barayo, helidda cid macallin u no-qota oo ay ka hoos-shaqeeyaan iyo waxbarasho, iyo maciishado la xiriira hab-nololeedka magaalooyinka iyo waxyaabaha uu suuqu u baahan yahay. Qorsheyaasha maciishadda magaalooyinka waa in ay ku saleysnaadaan lafaguris lagu sameeyey suuqa iyo helidda dey-mo (la kabayo oo dibna loo soo celinayo) oo lagu aasaaso ganacsiyada;

b. hubinta in suuqu uu ku yaallo meel aan ka fogeyn oo la gaari karo ama in nooliga gaadiidka dadweynaha uu yahay mid la kabo;

t. bixinta waxyaabaha loogu baahan yahay maciishadda, sida beeraha yaryar ee magaalooyinka ama barnaamijyo kale oo u dhow;

j. bixinta agab iyo kaabayaal loogu talogaley hawlaha wax soo saarka, sida jikooyin ka hadba meel la geyn karo oo loogu talogaley foornooyinka yar-yar ama farsameyn ta agabka caafi-dhowrka;

x. bilaabidda qorsheyaal shaqo-lacag-ku-beddelasho, oo looga faa'iideysto dhisidda hoy, ururinta qashinka, hawlaha dayactirka iyo dib-u-dhiska, iyo soo-ururinta qoryaha la shito;

kh. in barnaamijyada tababarka dhallinyarada lagu xiro xirfadaha adeegyada iyo ganac si-abuurista ee lacag-shaqo-ku-beddelashada ama barnaamijyada kale ee maci ishadeed, iyo in labada banraamij ee tababarka iyo lacag-shaqo-ku-beddelashadaba lagu xiro fursadaha shaqo ee suuqa ka jira ee la soo ogaadey;

d. ka-qayb qaadashada hawlaha kale ee tababarka xirfadaha; gaar ahaan in diiradda la saaro kala-barashada xirfadaha iyo sidoo kale xirfadaha suuq-geynta, iyo hubinta in fursadaha tababarrada xirfadeed lala xiriiriyo baahiyaha la soo ogaadey in ay jiraan iyo fursadaha ka jira suuqa shaqada; iyo

r. bixinta tababar akhris-qoraal iyo barashada ku-shaqeynta kombuyutarrada.

5. Helidda siinta iyo u-beddelidda dokumentiyada shakhsiga ah.

   Waa in la qaadaa tallaabooyinkan soo socda:

   b. in qaxootiga iyo barakacayaasha lagu daro diiwaangelinta dhalashada iyo dadaallada kale ee dokumenti-u-sameynta, iyaga oo aan la sheegeynin in ay yihiin barakacayaal;
   t. hubinta in qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha ay helaan dokumenti-u-sameyn, taas oo ay ka mid tahay in si caqabad la'aan ah ay u gaari karaan meelaha dokumentiyada lagu bixiyo, iyo in halkii ay lagama maarmaan tahay la siiyo gargaar maaliyadeed, si awood loogu siiyo in ay helaan dokumentiyada loo baahan yahay; iyo
   j. hubinta in haweenka iyo carruurta barakacayaasha ah dokumentiyadooda loogu sameeyo magacyada iyagu leeyihiin.

6. Dhiirrigelinta iyo fududeynta in si khiyaari ah ay ku midoobi karaan qoysaska kala maqan.

7. Dhiirrigelinta in qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha ay arrimaha dadweynaha iyo dhammaan geeddi-socodyada iyaga saameynta ku leh ay uga qaybgeli karaan si la mid ah sida bulshooyinka degaanka, si looga hortago in la fogeeyo ama la riixo iyo si loo dhiso midnimada bulshada.

8. In ay soo gaari karaan habraacyo lagu dhayayo dhibaatada loo geysto iyo kuwo garsoor oo taabogal ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin kiisaska ku saabsan tacaddiyada la xiriira xaaladdooda barakac iyo helidda magdhow halkii ay ku habboon tahay.

## CUTUBKA 4AAD: QAABKA GUUD EE DOORARKA IYO MAS'UULIYADAHA LA KALA LEEYAHAY

Cutubkan waxaa uu qeexayaa doorarka iyo mas'uuliyadaha Dawladda Federaalka Soomaaliya, Dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir, bulshooyinka uu barakacu saameeyey, bulshada rayidka ah, beesha caalamka iyo Guddi-Hawleedda Wasiiirrada ka Dhaxaysa ee Qaxootiga Soo Noqdey iyo Barakacayaasha / *Inter-Ministerial Task Force for Refugee-Returnees & IDPs* (ITRRI).

### 4.1 Doorkarka iyo mas'uuliyadaha Dawladda Federaalka Soomaaliya

Qaybtan waxaa ay ka munaaqashooneysaa doorarka iyo mas'uuliyadaha wasaaradda hormuudka u ah iyo wasaaradaha kale, iyo door gaar ah oo ay leedahay Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha.

#### 4.1.1 Doorarka iyo mas'uuliyadaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta

1. Heer federaal, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, iyada oo u soo mareysa Hay'adda Qaran ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha (NCRI), waa wasaaradda hormuudka u ah oo mas'uul uga ah gudaha dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dhammaan waxqabadyada taageeraya xalal waara oo loo helo qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha. Wasaaraddan waxaa ay mas'uul ka tahay hubinta in qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha ay gargaar iyo ilaalin siiyaan dhammaan hay'adaha federaalka ah ee u habboon iyo la-hawlgalayaashooda. Gaar ahaan, waxaa ay hubineysaa in xalalka waara ee qaxootiga iyo barakacayaasha si ku filan ay uga hadlaan qorshayaasha horumarinta iyo bani'aadamnimada iyo qaababka guud ee siyaasadda iyo shuruucda ay hubiyaan in la ilaaliyo xuquuqaha qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha.
2. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka Dib-u-heshiisiinta, iyada oo u mareysa hay'adda NCRI, ayaa mas'uul ka ahaan doonta isuduwidda, korjoogteynta, kormeerka iyo qiimeynta waxqabadyada hay'adaha Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo kuwa Dawlad-goboleedyada ee dhammaan arrimaha la xiriira maareynta qaxootiga soo noqdey iyo barakaca dadka reer Soomaaliya.
3. Hay'adda NCRI, oo haysata taageerada siyaasadeed ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, ayaa ah hay'ad qaran oo arrimahan wakiil ka ah oo ay hawsheedu tahay fududeynta isuduwidda dawladda dhexdeeda ee waxqabadyada la xiriira soo-kabashada, ilaalinta iyo wanaagga qaxootiga, qaxootiga Soomaaliyeed ee soo noqdey iyo barakacayaasha.
4. Hay'adda NCRI ayaa ka mas'uul ahaan doonta in markii lagama maarmaan ay tahay uu sa-

meeyo uuna joogteeyo xog ururan oo ku saabsan kuwa loo adeegey (*service-user dataset*) ee la xiriirta qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha taas oo gebi ahaanba loogu taloga-ley in loo adeegsado adeeg-bixinta.

### 4.1.2 Doorarka iyo mas'uuliyadaha wasaaradaha kale

Siyaasaddan waxaa ay aqoonsan tahay doorarka wasaaradaha kale ee heer federaal iyo heer daw-lad-goboleedba, iyo waaxaha Maamulka Gobolka Banaadir ee mas'uuliyadaha ka saaran qaxoot-iga iyo barakacayaasha ee la xiriira hawlahooda. Wasaaradaha gaar ahaan ka mas'uulka ah waa Wasaaradda Qorsheynta (MOPIED), Wasaaradda Arrimaha Bani'aadanimada iyo Maareynta Ma-siibooyinka, Wasaaradda Caddaaladda, Wasaaradda Caafimaadka, Wasaaradda Waxbarashada, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Waasaaradda Horumarinta Haweenka iyo Xuquuqa-ha Aadamaha, iyo Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga, inkasta oo wasaarado kale ay ku lug yeelan karaan meelaha ay ku habboon tahay. Iyaga oo taageero ka helaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, wasaaradaha mas'uulka ah waa in ay gaar ahaan:

b. dib-u-eegis ku sameeyaan shuruucdooda iyo siyaasadahooda arrimahan la xiriira si ay u hubiyaan in ay ku daraan qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha, iyo in ay wax ka qabtaan baahiyahooda iyo nugeylkooda gaarka ah; meelaha aaney shuruuc iyo siyaasado ka hadleynin dadkaan, waa in sida u habboon wax looga beddelaa oo loo waafajiyaa;

t. dib-u-eegis ku sameeyaan qorsheynta iyo barnaamij u-dejinta shuruucda iyo siyaasadaha waaxeed si ay u hubiyaan in qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha ay awoodaan in ay soo gaaraan ayna ka faa'iideystaan barnaamijyadaas si la siman muwaadiniinta kale ee Soomaaliyeed; iyo

j in baahiyaha gaarka ah ee qaxootiga, barakacayaasha iyo bulshooyinka uu barakacu saa-meeyey ay ku dhafaan qorsheyaashooda, barnaamijyadooda iyo mashaariicdooda waax-eed.

Wasaaradda Warfaafinta, waxaa ay kaalinteeda, ka-qaybqaadan doontaa ayna bixin doontaa adee-gyada baahinta macluumaadka la xiriira taageerada qaxootiga soo noqdey iyo barakacyaaasha ee dhammaan warbaahinta iyada hoos yimaada.

### 4.1.3 Doorka gaarka ah ee Wasaaradda Qorsheynta (MOPIED)

MOPIED waxaa ay leedahay unug gaar ah oo u qaybsan xalalka waara ee la xiriira baahiyaha qax-ootiga soo noqdey iyo barakacayaasha. Unuggan waxaa uu dareen gaar ah u leeyahay adkeysiga dadka magaalooyinka (*urban resilience*), ilaalinta bulshada (*social protection*), wax ka qabashada aafooyinka iyo dejinta qorsheyaasha degmooyinka degaanka – dhammaan arrimaha iyo mowdu-ucyada si gaar ah u khuseeya raadinta xalal waara oo loo helo qaxootiga soo noqdey iyo baraka-cayaasha.

Siyaasaddan waxaa ay aqoonsan tahay in doorka Wasaaradda Qorsheyntu (MOPIED) uu yahay isuduwidda, korjoogteynta iyo kormeerka dhammaan mashaariicda iyo barnaamijyada la xiriira xalalka waara ee heer qaran iyada oo kala shaqeyneysa hawl-wadeennada iyo deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah iyo kuwa gobolka ee ka shaqeeya xalalka waara.

### 4.2 Doorarka iyo mas'uuliyadaha Dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir

Siyaasaddan waxaa ay aqoonsaneysaa doorarka muhiimka ah ee ay Dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir ay ku leeyihiin geeddi-socodyada gurmadka degdegga ah, dib-u-dejinta iyo xalka. Sidaa daraaddeed hay'adaha ay khuseyso ee Dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir ayaa si dhow Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ugala shaqeynaya:

b. qorsheynta ku-talogalka ah ee xaaladaha degdegga ah oo la halmaala barakac cusub oo suuragal ah;

t. dib-u-dejinta iyo qorsheynta xalka, si waafaqsan mabaa'diida loogu dejiyey Cutubka 2aad ee siyaasaddan;

j. u qoondeynta degaanno ay ka shaqeeyaan hay'adaha bani'aadamnimada ee ku hawlan gargaarka qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha; iyo

x. hirgelinta Habraaca Qaran e Dadka Ka Saaridda Hoyda ama Dhulka ay Deggan yihiin (*National Eviction Guidelines*) ee uu ansaxiyey Golaha Wasiirrada ee Dawladda Federaalka ee Soomaaliya oo gacan ka helaya ITRRI (eeg Qaybta 4.6 ee siyaasaddan).

Siyaasaddu waxaa ay aqoonsaneysaa siyaasadaha, istiraatiijiyadaha iyo qorsheyaasha hawleed ee Dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir ee la xiriira qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha, intiiba aaney ka hor imaaneynin siyaasaddan. Waxaa ay sidoo kale aqoonsaneysaa xuquuqda ay Dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir ay u leeyihiin guddi-hawleedyo farsamo oo heer degmo ah oo u qaabilsan xalalka barakacayaasha si ay u fududeeyaan isuduwidda iyo hirgelinta mashaariicda xalalka waara ee heer deegaan.

### 4.3 Doorka bulshooyinka uu barakacu saameeyey

Bulshooyinka uu barakacu saameeyey ayaa ah kuwa sida ugu wanaagsan u fahmi kara baahiyahooda, arrimaha mudnaanta u leh iyo arrimaha ay ku hamiyayaan. Sidaa daraaddeed, dhammaan hawl-wadeennada soo hoos-gelaya siyaasaddan waa in ay:

b. awood-siiyaan qaxootiga soo noqdey, barkacayaasha iyo bulshooyinka kale ee uu barakacu saameeyey, waana in ay abuuraan deegaan ammaan ah oo ay ku muujin karaan fikirkooda iyo waxyaabaha welwelka ku haya;

t. abuuraan deegaan awood-siinaya iyo qaabab loo wada dhan yahay oo laga wada-qaybqaato oo qaxootiga, barakacayaasha iyo bulshooyinka kale ee barakacu uu saameeyey lagu wargaarsiin karo, lagula tashan karo ayna kaga-qaybgeli karaan dhammaan go'aamada waaweyn ee saameynaya noloshooda iyo mustaqbalkooda; iyo

j. ay bixiyaan dadaal kasta oo ay ku heli karaan fikirka ay qabaan haweenka, dadka waayeelka ah, dhallinyarada qaangaarka ah iyo carruurta, dadka naafada ah iyo kooxaha kale ee nugul.

### 4.4 Doorka bulshada rayidka ah ee heer qaran

Siyaasaddan:

b. waxaa ay aqoonsan tahay doorka muhiimka ah ee bulshada rayidka ah ee Soomaaliyeed ay ku leedahay gacansiinta, ilaalinta iyo taageeridda xalal waara oo loo helo bulshooyinka barakacay; waxaana

t. ay bulshada rayidka ee heer qaran ku tirtirsiineysaa in ay isu duwaan waxqabyadooda ay ku taageerayaan bulshooyinka barakacay, iyo in ay barnaamijyadooda iyo waxqabadyadooda ku taageeraan mabaa'diida ku jira siyaasaddan.

### 4.5 Doorka beesha caalamka

1. Siyaasaddan waxaa ay aqoonsan tahay doorka muhiimka ah ee beesha caalamku ay guud ahaan – iyo gaar ahaan hawl-wadeennada bani'aadamnimada, horumarinta, xuquuqaha aadanaha iyo nabad-dhisidda – ay ku leeyihiin:

b. taageeridda dadaallada bani'aadamnimada ee dawladdu ay gacan iyo ilaalin ku siineyso qaxootiga soo noqdey, barakacayaasha iyo bulshooyinka uu barakacu saameyey marka uu jiro barakac muddo gaaban iyo mid dabadheerba;

t. gacan-siinta, ilaalinta iyo taageeridda xalalka waara ee qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha;

j. ka gacan-siinta hay'adaha dawladda ee heerarka qaran iyo goboleedba ururinta iyo lafagurista xogta ku saabsan arrimaha barakaca;

x. ka gaancsiinta dawladda, heer qaran iyo heer dawlad-goboleedba, qorsheynta ku-talogalka ah iyo u-diyaar-garoobiddeeda wax ka qabashada barakaca mustaqbalka dhici kara; iyo

kh. xubno ka noqoshada qaababka isudiwidda, guddiyada la-talinta ama guddi-howleedyada u habboon si loo hubiyo hirgelinta siyaasaddan.

1. Siyaasaddan waxaa ay ixtiraam u haysaa, gaar ahaan, mabaa'diida bani'aadamnimada ee aadanenimada, eex-la'aanta, madax-bannaanida iyo dhex-dhexaadnimada, waxaana ay la soconeysaa sida ay mabaa'diidan ugu dhaqmeyso beesha caalamka.

### 4.6 Doorka guddi-hawleedda

Guddi-hawleed isla shaqaynta wasaarradaha(interminiserial task force) (oo ka kooban xubno heer federaal ah iyo kuwo heer dawlad-goboleed ah) ayaa la dhisi doonaa si ay gacan u siiyaan qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha. Siyaasadda oo dhinacyo badan taabaneysa ayaa macnaheedu yahay in loo baahan yahay in ay ku lug yeeshaan wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda ee heerarkoodu kala duwan yahay. Guddi-hawleedda waxaa ay taageeri doontaa qaxootiga soo noqdey iyo barakacayaasha, waxaana ay isuduwi doontaa ayna kormeeri doontaa doorarka iyo mas'uuliyadaha kala duwan ee lagu qeexay Cutubka 4aad ee siyaasaddan. Guddi-hawleedda ITRRI waxaa ay diyaarin doontaa qaab isuduwid oo heer hawlgal ah oo isuduwa heerarka federaalka iyo dawlad-goboleedyada. Guddi-hawleeddu waxaa ay ka koobnaan doontaa hay'adaha heer federaal iyo kuwa dhigaggooda ah ee heer dawlad-goboleed iyo heer Maamulka Gobolka Banaadir ah:

- Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta;
- Wasaaradda Arrimaha Dibadda;
- Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiyga iyo Horumarinta Dhaqaalaha
- Wasaaradda Maaliyadda;
- Wasaaradda Amniga Qaranka;
- Wasaaradaha Adeegyada Bulshada (Caafimaadka, Waxbarashada, Biyaha);
- Wasaaradaha Horumarinta Dhaqaalaha (Kalluumeysiga, Beeraha, Xoolaha, Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guriyeynta, Shaqada iyo Shaqaalaha iyo Arrimaha Bulshada);
- Wasaaradda Arrimaha Bani'aadamnimada iyo Maareynta Aafooyinka;
- Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga;
- Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqaha Aadamaha; iyo
- Wasaaradda Garsoorka.

b. Guddi-halweedda ITRRI waxaa ay isu keeni doontaa dhammaan hawl-wadeennada heer qaran ee kor lagu soo xusay waxaana ay awood u lahaan doontaa in at kormeerto hawlahaan waxaana ay hoggaamin doontaa geeddi-socodka hirgelinta siyaasaddan.

t. Guddi-halweedda ITRRI waxaa ay diyaarin doontaa ayna ansaxin doontaa tilmaamo shaqo oo qoran oo hagi doona hawsheeda.

j. Hay'adda NCRI ayaa fududeyn doona kulammada ITRRI oo siinna doona taageero farsamo.

x. Kulammada guddi-hawleedda ITRRI waxaa guddoomin doona Wasiirka Arrimaha Gudaha haddii kulanka ay isu imanayaan wasiirro ama wasiir-ku-xigeenno. Hase yeeshee, haddii ay isugu imanayaan wakiillo ka socda hay'adaha kala duwan ee dawladda oo heer farsamo ah, Guddoomiyaha Hay'adda NCRI ayaa guddoominaya kulanka guddi-hawleedda ITRRI.

## CUTUBKA 5AAD: HIRGELINTA IYO QORSHE-HAWLEEDKA QARAN

Geeddi-socod wadatashi oo uu martigeliyey Hay'adda NCRI, oo ay hawshiisu lahayd Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, ayaa Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxaa ay diyaarisey Qorshe-Hawleed Qaran. Qorshaha ayaa la qorey ka hor inta aan la diyaarin siyaasaddan. Qorshaha waqtigan waxaa uu waqtigiisu ku egyahay 2020-ka, laakiin dib-u-eegis ayaa lagu sameyn doonaa qorhse cusub oo noqonaya mid ka mid ah qaababka loo hirgelinayo siyaasaddan.

Hirgelinta siyaasaddan waxaa sidoo kale loo mari doonaa dhammaan mashaariicda iyo barnaamijyada ay Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya ay ansaxisey maaliyaddooda oo isku dayaya in ay kaabaan adkeysiga, soo-kabashada iyo isku-milmidda bulshooyinka uu barakacu saameeyey. Hirgelinta siyaasaddan waxaa sidoo kale loo xaqiijin doonaa si waafaqsan Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo dhammaan qorshe-hawleedyada qaran ee kale ee u habboon.

Siyaasaddan waxaa dib-u-eegis, wax-ka-beddel iyo dib-ugu-noqosho loogu sameyn doonaa hadba sida loogu baahdo.

***Ra'iisul Wasaaraha Dawladda Federaalka Soomaaliya***